# Dakhliga Kabitaanka ah ee Lambarka Bulshada (SSI) ee Dadka Aan Heysan Dhalashada.

Miiska ku jira


| | |
|---|---|
| Yaa Qaadan Kara Dakhliga Kabitaanka ee Lambarka Bulshada? | 1 |
| Qaar ka mid ah dadka aan heysan dhalashada ee xaqa u yeelan kara lacagta SSI waa: | 2 |
| Tobada sano ee xadka u ah dadka aan heysan dhalashada | 2 |
| Dhibcaha Shaqada | 2 |
| Cadeyn Shariga Ayaa Lagaaga Baahan Yahay | 3 |
| Macluumaad ku saabsan Medicaid | 3 |
| Waxa aad soo gudbin karaa codsi cusub | 3 |
| Haddii ay jirto cid damaanatay | 3 |
| Lambarka Bulshada | 3 |
| qaadashada Dhalashada | 4 |
| La Xiriirka Lambarka Bulshada | 4 |


## Yaa Qaadan Kara Dakhliga Kabitaanka ee Lambarka Bulshada?

Guud ahaan, haddii aadan heysan dhalashada oo aad sharciga ku joogto mid ka mid sha sharciyada waddankan loogu soo haajiro ee ay dajisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha (DHS), waxaa suiurogal in aad xaq u yeelato SSI haddii:

- Waxa aad si sharci ah waddanka Mareykanka ilaa Agoosto 22, 1996 waxaadna tahay indhoole ama naafo; ama
- Waxa aad qaadaneysay SSI 22kii Agoosto 1996kii waxaadna si sharci ah ku daganeyd Mareykanka; ama
- Waxaa laguu ogolaaday ogolaasho rasmi ah sida uu dhigayo Sharciga Hijrada iyo Dhalashada (INA) waxaadna shaqeysay 40 dhibacood mareykanka Gudihiisa. (Shaqada xaaskaaga ama tan waalidkaa waa laguu xisaabayaa.)

***FIIRO GAAR AH::*** *Haddii aad Mareykanka taariikhdu markaey aheyd ama ka dib Agoosto 22, 1996, oo ka dibna aadan xaq u yeelan SSI shantii sano ee u horeysay oo aad heysatay sharci deganaasho rasmi ah, xitaa haddii aad shaqeysay 40 dhibcood ee shaqada.*

## Qaar ka mid ah dadka aan heysan dhalashada ee xaqa u yeelan kara lacagta SSI waa:

- Xubnaha ka tirsan ciidamada Mareykanka ee shaqada ku jira;
- Dadka aan heysan dhalashada ee qaabiilada Indiya ee dawladdu aqoonsan tahay;
- Qaar ka mid ah dadka aan heysan dhalashada ee lagu ogolaaday sharciga Amerasian;
- Dadka Cuban/Hatianka ee sharciga Gargaarka Waxbarashada ee Qaxootiga.
- Dhibanayaasha qaarkood ee dhuumaaleysi ku gelinta; iyo
- Qaxootiga Ciraaqiyiinta ama Afganistaan oo loogu ogolaaday sharciyada hijrada ee gaarha ah si sharci ahna waddanka ku degan.

Kuwan waa kuwo kale ee xaqa u yeelan kara lacagta. Haddii aadan heysan dhalashada oo aad ddoneyso in aad codsato macaashka SSI, la soo xiriir si aad u ogaato in aad xaq u leedahay.

## Tobada sano ee xadka u ah dadka aan heysan dhalashada

Qaar qaxootiga ka mid ah iyo dadka aan heysan dalashada ayaa qaadan kara SSI ilaa todoba sano. Haddii SSIdaada lagu xadido todoba sano xaaladaada gaar ahaaneed ee inaadan heysan dhalashada darteed, waxaanu kuu soo direynaa aanu kugu wargelineyno marka ay dhamaaneyso mudada shanto sano. Waxaanu kuu soo direynaa waraaq kale oo aanu kuugu sharxeyno waxyaabaha aad xaqa u leedahay ka hor inta aynaan joojin lacagta lagu siiyo.

Haddii aad horey u qaadan jirtay ama aad iminka qaadato SSI oo saameyn uu ku yeeshay sharciga ku xadidaya todoba sano, oo aad codsatay dhalashada, waxaan kugu dhiirigelineynaa in aad la xiriirto Waaxda Adeegga Socdaalka iyo Dhalashada ee Mareykanka (USCIS) si aad u ogaato sida:

- Loo dadajiyo codsigaaga dhalashada (N-400) ama codsiga deganaashaha rasmiga ah ee aad waddanka ku joogto (I-485); iyadoo
- Lagaa dhaafayo lacagaha lagu bixiyo codsiyadaas.

Adiga (ama wakiilkaaga) waxaa ay wici karaan telefoonka USCIS ee **1-800-375-5283** (sug ilaa laga gaaro doorashada SSI kana dooro kana dooro doorashooyinka hore) ama **1-800-767-1833** haddii aad dhagole tahay ama maqalku kugu adag yahay (TTY), oo aad codsatay in la dadajiyo. Waxa kale oo aad codsan kartaa in la dadajiyo adiga oo qoraal ku codssada ama taga xafiiska degmada USCIS. Hubi in aad u sheegto in aad horay u qaadan jirtay ama aad iminka qaadato SSI. Si aad xog dheeraad ah uga ogaato, la soo xiriir xafiiska degaanka ee USCIS ama soo booqo bogga internetka ee USCIS ***www.USCIS.gov/feewaiver***.

***FIIRO GAAR AH:*** *Mudada todobada sano ee xaqa ay u leeyihiin qaxootiga, dadka muhaajiriinta, iyo dadka soo haajira qaarkood, oo ay ka mid yihiin dhibayanaasha dadka dhuumeeleysiga lagu soo geliyo, waxaa lagu kordhiyey laba sano (ama ilaa sdex sano xaaladaha qaarkood) mudada u dhaxeysa 1da Oktoobar 2008 ilaa 30 Siteembar 2011. xog dheeraad ayaa ku heli kartaa haddii aad soo booqato* ***www.socialsecurity.gov/pubs/11051-sup.html***.

## Dhibcaha Shaqada

Taariikhda hore ee shaqada ayaa lagu ogaadaa in qofku xaq u leeyahay macaashka Lambarka Bulshada iyo sidoo kale xaq u yeelashada SSI. Qofku waxa uu kasbadaa dhibcaha shaqada taasoo ku saleysan lacagta uu shaqeeyo. Tirada loo baahan yahay si aad u hesho dhibcaha sahqada waa mid isbedeleysa oo kordheysa sanad walba iyada oo celcelika heerka dakhliga uu kordhayo.

Marka laga hadlayo macaashka Lambarka Bulshada, waxa uu qofku kasban karaa ugu badnaan afar dhibcood sanad kasta iyadoo ku

*(rogad)*

saleysan dakhliga soo gala. Dadka aan heysan dhalashada iyaguna sidoo kale waxa ay sanad kasta kasban karaan dhibcaha taasoo ku saleysan shaqada xaaska ama waalidka.

Dhibcaha shaqada waa kuwa si joogta ah ugu lifaaqan diiwaanka shaqada ee qofka. Dhibcaha dheeraadka ah ee xaaska/sayga ama waalidka waxa ay kaa caawin karaan xaq u yeelashada laakiin aan lagu qorin diiwaanka dhibcaha shaqada ee aan heysan dhalashada mana loo xisaabo si loo ogaado ogaashaha xaq u yeelashada macaashka. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, akhri (Sidee lagu kasbadaa dhibcahja) *How You Earn Credits* (SSA Publication No. 05-10072) (daabacaadda lamrkeedu yahay 05-10072).

## Cadeyn Shariga Ayaa Lagaaga Baahan Yahay

Marka aad codsaneyso SSI waa in aad keentaa sharciga aad waddanka ku joogto. Dadka aan heysan dhalashada ee ka soo shaqeeyay ciidamada Mareykanka waa in ay keenaan caddeyn adeegga ciidamada. Qaar ka mid aqoonsiyada lagaaga baahan waxaa ka mid ah:

- Caddeynta sharciga — Foomka I-94 (diiwaanka soo gelitaanka) oo aan weli dhicin, ama I-551 (kaarka deganaashaha rasmiga ah) ee DHS ama amar qaali maxkamadaha socdaalka oo joojiyey in waddanka laga saaro.
- Cadeyn ka tirsanaasha ciidamada — warqadaha looga saaray ciidamada (DD Foomka 214) oo caddeynaya in si sharaf lerh lagaaga saaray kuna saleysan in aadan heysan dhalashada.

Xafiiska Lambarka Bulshada ee degaanka aad degan tahay ayaa kuu sheegi kara nooca caddeynta ah ee cadeynaa sharciga aad waddanka ku degan tahay.

## Macluumaad ku saabsan Medicaid

Haddii aad leddahay ceymiska caafimaadka oo ku saleysan SSI waa in ay kuu ceymiska caafimaadka Medicaid inta aad qaadaneyso SSI.

## Waxa aad soo gudbin karaa codsi cusub

Haddii lagaa joojiyo lacagta SSI waayo waxa aad tahay qof aan heysan dhalashada oo aan xaq u laheyn, mar kale ayaad codsan kartaa. Degdeg noola soo xiriir haddii sharciga aad waddanka ku joogto is bedelo ama aad qaadato dhalashada Mareykanka, ama aad u maleyneyso inaad xaq u leedahay ama aad shaqeysay 40ka dhibcood ee shaqada. Waxaa laga doonayaa in aad keento cadeyntadhalashada Mareykanka ama wixii kale oo cadeynaya sharciga aad waddanka ku joogto.

## Haddii ay jirto cid damaanatay

Markii aad soo gashay Mareykanka, waxaa laga yaabaa in qof uu kuu saxiixay heshiiska ah inuu ku taageerayo. heshiiskaas waxaa lagu magacaabaa «Maragkaca Taageerada (damaanad)», qofka kuu saxiixeyna waxaa la yiraahdaa damiinte.

Waxa aanu xisabinaa qeyb ka mid ah dakhliga qofka ku damiintay iyo dakhliga xaaskiisa iyo waxa aad heysato tan iyo marki aad timid Mareykanka. Xafiiska Lambarka Bulshada ee degaanka ayaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo sharciyadan ku saabsan iyo sida ay kuu khuseeyaan.

## Lambarka Bulshada

Haddii aad tahay qof aan heysan dhalashada wadanka Mareykana si sharci ah ku jooga, waxaa laga yaabaa in aad u baahato Lambarka Bulshada. Weydiiso *Social Security Numbers for Noncitizens* (Publication No. 05-10096) (Lambarka Bulshada ee dadka aan heysan dhalashada Daabacaadda 05-10096.



*(rogad)*

## qaadashada Dhalashada

Si xog dheeraad ah iuga ogaato sida lagu qaato dhalashada mareykanka, kala xiriir USCIS **1-800-375-5283** (Dadka dhagaha la'a ama maqalka ku adag yahay la xiriir lambarka TTY, **1-800-767-1833**). Waxa kale oo aad la xiriir kartaa xafiiska degaankaaaga ee USCIS, ama soo booqo bogooda internetka ee ***www.uscis.gov***.

## La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

### Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda ***www.socialsecurity.gov***. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*), ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada laguu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

### Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.

Securing today and tomorrow

**Social Security Administration**
Publication No. 05-11051-SO | August 2017
Dakhliga Kabitaanka ah ee Lambarka Bulshada (SSI) ee Dadka Aan Heysan Dhalashada.
Supplemental Security Income (SSI) for Noncitizens (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha